Dulmarista Hawlfulineed

Hordhac

Qaadku waa geed dhireed ka kooban caleenta iyo laanta geedka Catha edulis. Waa la calaaliyaa si looga helo dareen fudud wuuna ka dareen abuur yar yahay noocyada kale ee maandooriyayaasha ah sida amphetamine iyo cocaine.

Qaadka lama ilaaliyo sharciga soo baxay 1971 ee KHaldan-u-Isticmaalka maandooriyeyaasha sidaa darteedna waxaa lagu isticmaalaa loona soo dhoofiyaa UK si sharci ah.

Qaadka waxaa UK looga soo dhoofiyaa gobolada aadka looga beero ee Kenya, Ethiopia iyo Yemen.

Guud ahaan, qaad cunistu waa arrin bulshadeed oo ka dhacda aqalada qoysaska, xafladaha bulshada iyo marfashyada makhaayadaha. Dhaqan ahaan qaadka waxaa loo isticmaali jirey dawo ahaan waxaana loo arki jirey cunto ee maandooriye looma arki jirin.

Dib-u-eegid

ACMD (Golaha Katala Bixinta si khaldan u Isticmaalka Mukhaadaraadka) waxay baadheen dhibka qaadka sanadkii 2005 waxayna garteen inaan qaadka lagu kontoroolin Sharciga Sixun-u-isticmaalka Maandooriyeyaasha ee soo baxay 1971, waxayse soo saareen qodobo dhowr ah oo waxbarasho iyo cilmi baadhis ah oo ay ku taliyeen.

Wasiirka ka masuulka ah maandooriyeyaasha ayaa weydiistey ACMD inay dib u eegaan cusboonaysiiyaana baadhistoodii 2005tii kana soo talo bixiyaan bal in lagu kontoroolo Sharciga Si xun u Isticmalka Maandooriyeyaasha ee soo baxay 1971.

Isticmaalaka Qaadka – Adduunweynaha

Majiraan wax xog lays barbar dhigo ama laga qiyaas qaadan karo caalami ahaan oo ku saabsan isticmaalka qaadka, mana jiraan caddaymo laysku hallayn karo oo la qoray sida qaadka loo isticmaalo wadamada yurub dhexdooda. Laakiin Yurub dhexdeeda dadka qaadka isticmaalaa waa kuwa badiyaa ka yimaada wadamada geeska Africa.

Isticmaalka qaadku wuxuu u muuqdaa mid sarreeya dadka Soomaalida, Yementa iyo Ethiopianka. Laakinse qaadka dadka Soomaalida ee deggan UK waxaa aad uga badsada kuwa ku nool Soomaaliya.

Istcmaalka Qaadka – UK
Marka laga qiyaas qaato cashuuraha dawladdu qaaddo, usoo dhoofinta qaadka UK wuu is dhimay ilaa 2005tii.

Muddadan dadka arrintani khusayso ee laga tiro badan yahay waddankan UK waxay kordheen 18.4%. tani waxay si cad u tilmaamaysaa in isticmaalka qaadka ee UK uu is dhimay.

Waqooyiga Ireland iyo Scotland masoo sheegaan dadka hay'adda caafimaadka lasoo xiriira ee laga daweeyo dhibka isticmaalka Qaadka iyo lambarka dadka Qaadka cuna midna.

Keliya 6 qof uun baa laga helay xogta ay hayaan dawladda Walashku oo ah dadka sida xun wax u isticmaala laga soo bilaabo 2009kii.

Xogta hay'adda caafimaadka ee England ee sanadihii 2010/11 waxay tusaysaa in 112 qof ay markii ugu horraysey noloshooda bilaabeen in laga daweeyo dhib uu keenay Qaadku.

ACMD waxay la socotaa in xogaha laga helo Hay'adda caafimaadku iyo meelaha kaleba aysan si buuxda u metelin baahida daaweynta dadka qaadka isticmaala waayo way adag tahay in lala xiriiro dhammaan kooxaha bulshada dhexdeeda.

Cilmi Ahaan Qaadka
Qaadku markuu cusub yahay wuxuu leeyahay cimri gaaban in marka la calaashado uu wax dareen ah keeno, qiyaastii 36 ilaa 48 saacadood laga bilaabo marka lasoo jaro ilaa marka la calaashado; waa marka la soo safriyo isagoo aad u cusub. Sidoo kale Qaadka waa la qallajin karaa waana la miiran karaa, laakiin labadan siyoodba aad bay u saamayn liitaan haddiiba ay wax awood ah ama firfircooni ah leeyihiin.

Cathinone iyo Cathine oo gaar loo saaray iyakoo ah walxo keligood ah oo laysku geeyey waa wax laysla meel dhigay oo lagu kontoroolay Sharciga 1971 ee si xun u isticmaalka maandooriyeyaasha. Tani waxay kasoo horjeedaa dabciga aan degganayn ee cathinone ee ku jirta geedka Qaadka taasoo degdeg isugu bedesha cathine.

In la sameeyo cathinone iyo cathine ayaa ka fudud kana jaban in laga soo saaro Qaadka markuu cusub yahay.

Inkastoo qaadka in la calaaliya ay tahay dariiqad hawlkar ah oo walxaha ku jira lagula soo bixi karo, hadana si dedeg ah uma soo baxaan, sidaa darteen waxaa loo baahdaa muddo dheer oo calaalin ah si loogala soo baxo waxa ku jira iyo saamayntiisa, mana laha dareen degdeg ku yimaada. Qaadka oo dhadhankiisu kharaar yahay iyo sida loo cuno ayaa dad badan ka joojisa cunistiisa.

Dhibka Daawo ahaan
Qaadka oo ay dhacdo in lala qabsado ayaa ka saamayn fudud in maandooriyaha cathinone oo keligeed ah la qaato.

Qaadku ma laha xiriir waxyeelo toos ah oo caafimaad ahaan uu keeno, marka laga reebo warbixino kooban oo la xiriiriyey isticmaalka qaadka sun beerka ah. Guud ahaan, wararka Qaadka laga faafiyo ee dhibka uu u keeno qofka waxay kasoo horjeedaan caddaymaha caafimaad ee la hayo. Walaacyo badan oo la sheegay waxaa laga yaabaa inay la xiriiraan arrimo kale oo loo baahan in si balaadhan loola eego caqabadaha iyo fursadaha haysta dadka isticmaala, dadka ajnebiga ah iyo dadka magangelyo usoo doonta bulshadeena.

Dhibka Bulshada
Caddaymo aan wada socon ayaa magaalooyin badan oo UK ah Qaadka cunistiisa la xiriiriyey dhibaatooyin badan oo uu mujtamaca ku hayo. Cilmi baaris ayaa lagu sameeyey dhibabkaas laakiin lama helin caddayn buuxda in cunista qaadku xiriir la leedahay dhibabkaas la sheegay.

Kooxihii Soomaalida ahaa ee soo hordhigay ACMD warbixinaha waxay sheegeen in cunista Qaadku leedahay dhib muuqda oo bulshadooda dhexdeeda iyo qoysaska dhexdoodaba ah. Waxaa taas kasoo horjeedda in bulshada Yamantu aysan wax dhib ah ku qabin cunista qaadka maadaama lagu cuno qoyska dhexdiisa oo ay qayb ka tahay arrimaha kale ee bulshada iyo qoyska.

Kooxdani waxay qaadka u isticmaalaan inta badan si aan dhib keenayn.

Qawaaniinta jirta ee caafimaadka, boliiska iyo dawladaha hooseba iyo kuwa ay kala wada shaqeeyaan bulshooyinka laga tiro badan yahay waxay sheegeen inay ku guulaystaan inay xalliyaaan dhibka ku xun dadka dhexdiisa ee lasoo gaarsiiyo.

Cilmi baadhisaha laga sameeyey London iyo Minneapolis waxay diiradda ku jeedinayaan sida dadka wax loogu qabto markay yimaadaan USA, iyo sida tani u kordhiso fursadaha shaqo helista, halka shaqadu ay tahay furaha wanaagga bulshada.

Ma jiro wax si toos ah ula xiriirinaya cunista qaadka dembiyada qorshaysan UK dhexdeeda, ama wax caddaynaya in Qaadka lacagtiisa lagu isticmaalo dembiyada. Tani maaha wax lala yaabo maadaama Qaadku uusan ahayn maandooriye mamnuuc ah, ma aha wax qiimo badan leh, sidaa darteedna waxaa laga helaa faa'iido aad u yar suuqyada UK.

Marka la eego dembiyada caalamiga ah, ACMD masoo helin wax caddaynaya in Al Shabaab ama koox kale oo argagixiso ah toona ay ku lug leeyihiin dhoofinta ama

iibinta Qaadka, inkastoo aanu wadatashi la samaynay hay'adaha waddaniga ah iyo kuwa caalamiga ahba.

Caddaymaha ay cilmi baarayaashu hor keeneen ACMD kuma jiraan xiriir ka dhexeeya dembiyada kooxaysan iyo isticmaalka Qaadka.

Arrimo Caalami Ah.
Sharciyo ku saabsan isticmaalka Qaadka ayaa laga soo saaray meelo badan oo Yurub iyo Waqooyiga Ameerica ah. Waxay u muuqataa go'aanada lagu mamnuucay isticmaalka Qaadka inaan lagu salayn caddaymo buuxa oo ku saabsan dhibka qaadku u keeni karo qofka ama bulshada, oo ay ku jiraan dembiyada gudaha iyo caalamkaba, laakiin lagu saleeyey arrimo kale.

Waxa ay keento sharciyayntu waa adag tahay in la qiyaasaa. Laakiin Qaadkii suuq buu ku haystaa xataa meelihii laga mamnuucay. Joojintii qaadka waxa kasoo baxay waa wax is dhexyaal ah mararka qaarna aan wada soconba.

Cabsi laga qabo in UK noqoto xarunta soo dejinta qaadka lagama dheehan karo xogta laga helayo cashuuraha dawladdu ka qaaddo marka laga hadlayo intuu la ekaa qaadka loosoo dhoofiyey UK ilaa 2005tii, ama wax kale oo tilmaamaya in UK tahay meel laga sii waarido tiro macno leh oo Qaad ah.

Walaacyada jira
Bulshooyinka laga tiro badan yahay maaha kuwo isku asal kasoo wada jeeda waxayse u dhexeeyaan qoysas halkan degganaa ilaa afar fac iyo kuwo magangelyo doon ah oo kasoo cararay dagaal sokeeye.

Dhibabka badan ee haysta dadka qaxootiga ah ee Qaadka cuna waxaa ka mid noqon kara: shaqo la'aan, sharci la'aan ama deganaansho rasmi la'aan, dhib ay hore usoo arkeen oo kusoo noqnoqota maskaxdooda, ehel la'aan ama bulshada oo aysan xiriir la lahayn, bulshada ay la deganaayeen oo laga dhex saaro, midabsooc, af ingiriisiga oo ku liita, arrimaha siyaasadda ee jinsiga ah, iyakoo aan helin cid ay ku daydaan, qaxootinimada oo lagu qiima ridoama hoos loogu dhigo, iyakoo aan shahaadooyinkoodii waxbarasho ee hore loo qiimayn, iyakoo aan helin guryo hagaagsan ama aan helinba guryo iyo daryeel caafimaad.

Talo soojeedin

Ilaa inta aan laga hayn caddayn markaa kallifaysa in la sameeyo faragelin u qalanta arrintan, ACMD kuma talin karto in Qaadka lagu kontroolo Sharciga Si xun u isticmaalka maandooriyeyaasha ee 1971. ACMD waxay qabtaa in walaacyadan isku yimid ee ku saabsan cunista Qaadka wax lagaga qaban karo talooyinkan lasoo jeediyey:

1) ACMD waxay soo jeedinaysaa in aan derejada qaadka ama sida hadda loo arko aan waxba laga bedelin laguna koontoroolin Sharciga si xun u isticmaalka Maandooriyeyaasha ee 1971.
2) Waxaa lagu talinayaa in agaasimayaasha iyo madaxda kala duwan ee hay'adaha caafimaadka qaranka iyo kuwa kale ee ka shaqeeya caafimaadkuba iyo kuwa ka shaqeeya daryeelka bulshaduba inay:
    - Ku daraan Qaadka qiimaynaha baahiyaha maxalliga ah gaar ahaan meelaha ay ku nool yihiin bulshooyinka laga tirada badan yahay ee cuna Qaadka;
    - Meelaha qaadka lagu isticmaalo ee bulshooyinka dhexdooda inay ku daraan Qaadka barashada waxyaalaha sida khaldan loo isticmaalo iyo weliba siyaalo looga hortegi karo;
    - Meelaha isticmaalka Qaadku ka jiro, waa inay sameeyaan waxqabad gaar ah oo loo sameeyey si dhaqanka waafaqsan iyo adeegyo baanasho ah kuwaasoo ay ka mid yihiin in laysku dayo 'caawin layska kaashado';
    - Inay Isku dayaan wadahadal iyo wada shaqayn ay la yeeshaan NGO-yada, qaybta saddexaad, ururada folanteeriga ku shaqeeya iyo bulshooyinka laga tiro badan yahay si markaa baahiyaha caafimaad iyo kuwa bulsho si caam ah wax looga qabto.
3) Waxay ku taliyeen meelaha laga sheego dhibaato bulsho oo uu keenay Qaadku, dawladaha hoose iyo guddoomiyeyaasha cusub ee boliiska iyo dembiyadu inay wax ka qabtaan iyakoo u maraya xiriir iyo lahadal ay la sameeyaan bulshooyinka iyo inay si fiican u wada shaqeeyaan hay'aduhu, iyadoo la kaashanayo wixii ka jira markaa iyo meeshaa iyadoo uu isku duwayo hawlahan Wada shaqaynta Nabadgelyada Bulshada iyo isticmaalka daaweyn bulshada ah;
4) Waxay ku talinayaan madaxda hay'adaha caafimaadka guud iyo nadaamka caddaaladda dembiyada iyo gudoomiyeyaasha boliiska iyo dembiyadu inay ku daraan isticmaalka Qaadka nadaam ay kula socdaan kuna ilaaliyaan, taasoo looga baahan yahay dhanka hay'adaha daaweynta iyo ilaalintaba, iyo inay sanadkiiba mar waxay ogaadeen ay daabacaan. Xogtani waxay sal u noqonaysaa cilmi baarisaha mustaqbalka ee Qaadka si wax looga qabto waxyaalaha lagu sheegay warbixintan.

Waxaa jirta baahi loo qabo cilmi baaris dheeraad ah oo laga sameeyo Qaadka si loo helo caddaymo wixii laga ogaado. ACMD waxay ka sanqarisay wixii ay arkeen Xarunta

Lasocodka Yurub ee Maandooriyeyaasha iyo Laqabsiga Maandooriyeyaasha taasoo ahayd “waxa laga ogyahay arrintan Qaadka inay iska yar tahay, iyo in waxyar uun laga yaqaan dhibka uu caafimaadka iyo bulshada u keeno qaadku”[1].

---

[1] EMCDDA. Isticmaalka Qaadka Yurub: wuxuu ku keeni karo siyaasadda Yurub. Lisbon. EMCDDA.2011.